# Deeqaha Xasilinta Daryeelka Carruurta Webinar Su’aal iyo Jawaab

*Walxaha turjuman ee The Imagine Institute iyo Voices of Tomorrow ee deeqda xasillinta daryeelka xanaanada caawinta farsamada qeyb ayay kawada yihiin*

## U -qalmitaanka

**S: Kani ma codsi hal mar ah Miyaa?**
J: Kani waa codsi hal mar ah.

**S: Haddii liisankaygu furan yahay, firfircoon yahay oo meel fiican marayo, laakiin aanan u adeegayn carruur, weli ma codsan karaa?**
J: Haa, goolku waa in la taageero bixiyeyaasha.

**S: Deeqaha waxaa lagu bixiyaa hal lacag ama lacag yar bishiiba ilaa 2022?**
J: Deeqaha waxaa lagu bixiyaa hal mar oo lacag ah. DCYF waxay eegi doontaa codsiyo cusub oo la soo gudbiyo bishiiba hal mar iyada oo loo marayo muddada dalabka rogista, laakiin adeeg - bixiye kasta wuxuu heli doonaa oo keliya hal deeq.

**S: Maxaa loola jeedaa "meel wanaagsan"? Sidee tan lagu qeexay?**
: “Meel Wanaagsan” waxaa loola jeedaa xarun daryeel ilmo ah oo ruqsad haysta ama liisan guri qoys haysta ama shadada bixiye haysta oo ama hadda haysta liisan firfircoon oo aan dhicin, xiran, la hakiyey, lana noqdin, ama haddii kale xaalad si kasta u xaddidaysa hawsha ee qof shati haysta oo hoos yimaad awoodda ruqsadda.

**S: Ma haysto caruur kabitaan ku qoran, laakiin waxaan leeyahay carruur ka socota saldhigyo milatari. Miyaan u qalmaa?**

J: Haddii aad tahay bixiye xanaanada cunugga liisan haysta, uma baahnid inaad ku kaalmeyso carruurta. Haddii aad tahay bixiye FFN, waa inaad u adeegtaa carruurta helitaanka kaalmada iyada oo loo sii marayo Xiriirada Shaqada ee Daryeelka Carruurta (WCCC) oo aad ka dalbato lacag -bixintaada kabitaanka Nidaamka Lacag -bixinta Adeegga Bulshada (SSPS).

**S: Ma siiyo daryeel carruurta kabka cawimaad  ah. Miyaan u qalmaa? Anigu waxaan ahay liisan guriga bixiye**

J: Haa, bixiyeyaasha xanaanada cunugga ruqsad haysta ayaa u qalma deeqdan xitaa haddii aysan u adeegin carruurta heleysa kaalmada. Kaliya waa bixiyeyaasha FFN ee looga baahan yahay inay noqdaan kuwa laga dhaafo liisanka oo u adeega carruurta helaya kaalmada.
**S: Head Start iyo ECEAP ma codsan karaan?**
J: Head Start iyo ECEAP uma qalmaan.

**S: Waxaan iibsanayaa xarun oo aan ku wareejinayaa ruqsad, xaruntayda cusub ma heli doontaa deeqdan?**
J: Bixiyeyaasha ruqsad haysta waa inay haystaan ruqsad furan oo meel  wanaagsan maraayo waqtiga codsiga iyo waqtiga abaalmarinta deeqda.

**S: Bixiyeyaasha aan weli ruqsad haysan laakiin rabaan inay julaay ka hor haystaan;  ma u qalmi doonaan deeqda?**
J:Bixiyeyaasha ruqsad haysta waa inay haystaan ruqsad furan oo meel wanaagsan marayo waqtiga codsiga iyo waqtiga abaalmarinta deeqda.

**S: Bixiyeyaasha miyay khasab ku tahay inay lacagtaan dib u bixiyaan?**
J: Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta ee DCYF ma aha deyn ay tahay in dib loo bixiyo waxaana loogu talagalay inay caawiso bixiyeyaasha.

**S: Haddii barnaamijkaagu ruqsad u haysto 50 carruur ah, ma laguu tixgeliyaa inaad ka weyn tahay "50" ama "ka yar tahay 50"?**
J: Haddii barnaamijkaagu leeyahay awood ruqsad oo ah 50, markaa waxaad heli doontaa qaddar barnaamij oo la xiriira awoodda ruqsadda leh ee 50. Xaddidyada kartida ee Barnaamijka Deeqda Xasilinta waa 30 ama ka yar, 31-149, iyo 150 ama ka badan.

**S: Haddii xanaanada cunugga ee ruqsada haysta loo oggol yahay 12 carruur ugu badnaan. Qaddarka deeqdeennu ma yahay $ 15k ama $ 24- $ 52k?**
J: Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurtu waxay ka kooban tahay: **xaddiga barnaamijka** + **qaddarka xoogga shaqaalaha** + **wax-ku-darrada**. Bixiyaha xanaanada cunugga guriga ee ruqsad haysta oo leh awood ruqsad u leh 12 ayaa u-qalmi doona qaddar barnaamij ah $ 15,000, xoog shaqaale oo ah $ 9,000 waxaana laga yaabaa inuu u qalmo ku-daris la xaqiijin karo (oo ku xiran shuruudo la xaqiijin karo oo gaar ah) qaddarrada laga bilaabo $ 0 ilaa $ 70,000. Celcelis ahaan, bixiyeyaasha xanaanada cunugga guriga qoyska ee shatiyeysan waxay ka heli doonaan sida ugu badan $ 24,000 ilaa $ 52,000.

**S: Haddii aan hadda u adeegin carruurta helo kaalmada, weli ma awoodaa inaa codsado deeq?**
J: Si aad xaq ugu yeelatid deeqda, bixiyeyaasha Qoyska, Saaxiibka iyo Dariska (FFN) waa inay u

adeegaan carruurta hesha kaalmada. Bixiyeyaasha xanaanada cunugga ruqsad haysta oo shahaado haysta uma baahna inay u adeegaan carruurta heleysa kaalmada si ay u codsadaan una helaan deeq.

**S: Daryeelka maalmeedka guriga ma u baahan yahay inuu noqdo bixiyaha FFN?**
**J:** Bixiyeyaasha xanaanada cunugga ruqsad haysta oo haysta sido kale rusqsad furan iyo xanaanda meel wanaagsan u marayo, iyo ayako ku mid ah bixiyeyaasha Qoyska, Saaxiibka, iyo Deriska (FFN) oo u adeegaya ugu yaraan hal cunug oo kaalmo ku jira afar ka mid ah waqtiga ama ha ahaato lixdii bilood ee la soo dhaafay ama laba ka mid ah saddexdii bilood ee la soo dhaafay oo sido kale la dalbaday kabitaanka iyada oo loo marayo Nidaamka Bixinta Adeegga Bulshada (SSPS) ayaa u -qalma Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta.

**S: Shuruudaha ma ku jiraan la socoshada tilmaamaha CDC -da sida fogeynta bulshada iyo xirashada maaska markee la xanaaneenayo caruurta**
**J:** Dhammaan bixiyeyaasha qaata Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta waa inay caddeeyaan inay hirgelin doonaan siyaasadaha raacaya tilmaamaha deegaanka/gobolka iyo inta ugu badan ee suurtogalka ah inay hirgeliyaan tilmaamaha Xarunta Xakamaynta Cudurrada (CDC).

## Qadarka Shaqaalaha

**S: Qadarka Xoogga Shaqaalaha ma lagu bixin karaa mushaharka iyo gunnooyinka?**
J: Qadarka xoogga shaqaalaha waxaa lagu bixin karaa kor u qaadista mushaharka iyo gunnooyinka. Qaddarkani waa inuu ka sarreeyaa inta aad caadi ahaan u bixiso. Qadarka barnaamijka iyo xaddiga lagu daro waxaa loo isticmaali karaa mushaharka shaqalaha caadiga ah.

**S: Qadarka Xoogga Shaqadu ma noqon doonaa mid dib u dhaqaajin leh si loo bixiyo mushahar kordhin dhawaan?**
J: Maalgelinta deeqda waxaa loo isticmaali karaa kharashaadka la oggol yahay ee la galay wixii ka dambeeyay Janaayo 1, 2021.

**S: Qaddarka xoogga shaqaalaha ma loo adeegsan karaa kororka ugu dambeeyay ee kharashaadka shaqaalaynta iyo mushaharka oo si degdeg ah u kordhay?**
J: Haa, qaddarka xoogga shaqaalaha waxaa loo isticmaali karaa in lagu kordhiyo mushaharka, iyo shaqalo korista iyo hawlaha haynta

**S: Qaddarka Xoogga Shaqaalaha ma loo adeegsan karaa gunnooyinka? Dad badan ayaa jeclaan lahaa inay siiyaan gunnooyin shaqaalahooda**
J: Haa.

**S: Ka waran haddii qof shaqaale lahayn? Ma u qalmaan Qadarka Xoogga Shaqaalaha ee ugu yar?**

J: Haa. Milkiilayaasha/hawlwadeennada guryaha qoyska ee ruqsadda haysta oo aan lahayn shaqaale kale baa isticmaali doona deeqa xaddiga xoogga shaqaalaha si ay u kordhiyaan magdhowgooda.

**S: Tan ma ku jir taa bixinta kharashaadka daryeelka caruurta ee shaqaalaha?**
J: Bixiyeyaasha waxaa laga yaabaa inay u isticmaalaan koritanka faa'iidooyinka heerarka shaqada, iyo korista shaqaalaha iyo hawlaha haynta. Kharashaadka daryeelka carruurta ee shaqaalaha ayaa laga yaabaa inay hoos yimaadaan qaybahan.

**Q: S: Mushahar shaqalaha kordhinta ma ku jirtaa mushaharka ugu yar ee 2022?**
J: Maya. Lacagta shaqaalaha waa inay ka sarreysaa inta ugu yar ee lagaa rabo inaad siiso shaqaalahaaga. Si kastaba ha ahaatee, xaddiga barnaamijka iyo xaddiga lagu daray waa loo isticmaali karaa mushaharka caadiga ah.

**S: Ma u isticmaali karnaa lacag si aan u taageerno shaqaalaha galaya qorshaha hawlgabka?**
J: Haa, bixiyeyaashu waxay u isticmaali karaan lacag si ay u hagaajiyaan dadaallada korista shaqalaha iyo hawlaha haynta

**S: Markaa guryaha qoysku waxay isticmaali karaan Qadarka Xoogga Shaqaalaha si ay lacagta isu siiyaan gabi ahaanba, laakiin xarumaha ma bixin karaan shaqaalahooda, ama ma siin karaan gunno?**
**J**: Qadarka xoogga shaqaalaha waa in loo adeegsadaa kordhinta mushaharka iyo faa'iidooyinka (tani waxay noqon kartaa gunno), ama korista shaqalaha iyo hawlaha haynta (sida gunnada saxiixan ama lacag dhiirrigelin ah). Haddii milkiilaha/hawlwadeenka guriga qoyska ee ruqsada haysta uusan lahayn wax shaqaale ah, waa inay adeegsadaan qaddarka xoogga shaqaalaha si ay u kordhiyaan mushaharkooda iyo faa'iidooyinkooda.

**S: Haddii aan kordhinno mushaharka shaqalaha, sidee baan u awoodi doonnaa marka deeqdu dhammaato?**
J: Bixiyeyaashu waxay siyaabo kala duwan u isticmaali karaan qaddarka shaqaalaha si loo kordhiyo magdhawga iyo hawlaha korista/ hawlaha haynta. Tani waxay u ekaan kartaa gunno, lacag -bixinno dhiirrigelin ah, faa'iidooyin dheeri ah, iyo in ka badan.

**S: Maxay macallimiinta u yihiin xarumo leh in ka badan 66 carruur ah oo ka qiimo yar macallimiinta kale? Maxaa qiil loo adeegsaday si loo go'aamiyo xadkaan?**
J: Wadarta guud ee Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurtu waxay ka kooban tahay saddex qaddar oo kala duwan: **xaddiga barnaamijka, cadadka xoogga shaqaalaha**, iyo **ku-darka** la xaqiijin karo. $ 98M oo ka mid ah $ 360M ayaa loo qoondeeyay caddadka xoogga shaqaalaha,

oo ay tahay in loo adeegsado kordhinta mushaharka shaqaalaha iyo faa'iidooyinkakooda ama hawlaha kale ee korista shaqaalaha iyo hawlaha haynta.

- Xaddiga barnaamijka waxaa lagu xisaabiyaa $ 500 x (laguduftay) awoodda shatiga leh, xaddiga barnaamijka ugu yar ee tahay $ 15,000 xaddiga barnaamijka ugu sarreeya ee tahay $ 75,000.
- Xisaabinta caddadka xoogga shaqaalaha ayaa la xisaabiyay iyadoo la adeegsanayo ratioda 1: 5. Sababtoo ah inta badan xarumaha xanaanada cunugga waxay leeyihiin ratioda 1:10, ku salaynta qaddarka shaqaalaha qiyaasta 1: 5 waxay dhab ahaanti siinaysaa doolar badan bixiyeyaasha xanaaneeyo caruurta tiroda badan
    - Qadarka ugu yar ee shaqaaluhu waa $ 9,000 halka ugu sarreeya ee shaqaaluhu waa $ 42,000. Barnaamijyadu waxay go'aamin karaan sida loogu qaybiyo cadadka shaqaalaha guud ahaan xooggooda, iyada oo loo sii jeedinayo koridda mushaharka, faa'iidooyinka ama waxqabadyo kale oo korista shaqaaleynta iyo hawlaha-haynta.
- **Qaddarrada lagu daray** waxay ku saleysan yihiin ahmiyadaha ku qoran bixinta miisaaniyadda, iyo macluumaadka la xaqiijin karo sida lambarka guriga Zipka(ZIP Code) iyo xogta kabka. Ku-dar kasta oo bixiye ah u-qalmo wuxuu ku dari doonaa $ 10,000 oo dheeraad ah wadarta deeqda.
- **Qadarka barnaamijka** iyo **qaddarrada dheeraadka** ah waxaa loo adeegsan karaa qiimaha mushaharka. **Qadarka xoogga** shaqaalaha waxaa loogu talagalay in wax looga qabto arrimaha xoogga shaqaalaha sida xannaanada carruurta oo gacan laga geysto xasilinta tan.

## Ku-darka La Xaqiijin Karo

**S: Ku-darrada La Xaqiijin Karo miyey isku mid yihiin iyadoon loo eegayn baaxadda barnaamijka? Waxaan la yaabay sida ay tani u tahay mid loo siman yahay**
J: Ku-darrada la xaqiijin karo kuma salaysna awoodda, waxay ku saleysan yihiin tirakoobka dadweynaha iyo macluumaadka kale ee lagu qeexay Dashboardka Deeqda Xasilinta Daryeelka Ilmaha:

**https://www.dcyf.wa.gov/practice/oiaa/reports/early-learning-dashboards/child-care-stabilization**

**S: Sidee loo cabiraa "Taageeridda sinnaanta isirka"? Taasi waxay aniga iila muuqataa wax xoogaa aan caddayn**
**j**: Bixiyeyaasha caawiya taakulaynta sinnaanta jinsiga waxaa qeexa Xafiiska DCYF ee Innovation, Alignment, and Accountability (OIAA) inay yihiin: Summadaha Zip -ka oo leh tirada ugu badan ee carruurta ku jira kooxaha jinsiyadaha/qowmiyadaha ee la kulma dheelitirnaan la'aanta

gelitaanka xanaanada iyadoo la adeegsanayo Sahanka Bulshada Maraykanka 2019 5-sano xogta heerka summada Zipka ah. Bixiyeyaasha FFN ee ku jira koodhadhka Zipka ayaa soo maraa qeexitaanka, iyo bixiyeyaasha ruqsad haysta ama shahaadada haysta nambarrada sibka kuwaas oo lagu qiimeeyay Heerka 3 ama ka sarreeya Early Achievers. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa onleenka Daryeelka Carruurta ee Xasilinta Daryeelka Ilmaha Soodhadhka Sababaha Koodhka:

**https://www.dcyf.wa.gov/practice/oiaa/reports/early-learning-dashboards/child-care-stabilization**.

**S: DCYF miyuu go'aamiyaa waxa lagu darayo barnaamijku heli doono?**
J: Bixiyeyaasha soo maro shuruudaha ay xaqiijin karto DCYF waxaa laga yaabaa inay u qalmaan sido kale u helaan qaddar dheeraad ah, marka lagu daro cadadka barnaamijkooda iyo cadadka shaqaalaha.

**S: Waa maxay waxyaababaha lagu daro? Miyay ku dari doonaan lamadegaanka xanaanada carruurta ama lamadegaanka xannaanada carruurta "xad -dhaaf"?**
Bixiyeyaasha soo maro shuruudaha la xaqiijin karo waxaa laga yaabaa inay u qalmaan inay helaan qaddar dheeraad ah, marka lagu daro cadadka barnaamijkooda iyo cadadka xoogga shaqaalaha. Qaddarradan lagu dari karo ee la xaqiijin karo waa la is kor sarikaraa, mid walibana wuxuu ku dari karaa $ 10,000 oo dheeraad ah wadarta deeqda ee bixiyeyaasha shatiga haysta, ama $ 250 dheeraad ah bixiyayaasha FFN ah:

- Ka hawlgala lamadegaanka Daryeelka Carruurta
- U adeegida ama ku yaal Bulshooyinka Midabka leh
- U adeega ama ku yaal bulshooyinka la hayb sooco, bulshooyinka dakhligoodu hooseeyo
- Taageerida sinaanta isirka
- Waxay ku taal aag leh saamayn cudurka COVID aad u saraysa
- Abaalmarinta Hagaajinta Tayada ee la seegay COVID *
- Ku sugitaanka safka xog ururinta natiijada COVID*

*FFN uma qalmaan

**S: Sideen ku helnaa khariidadaas la xaqiijiyay?**
J: **https://www.dcyf.wa.gov/practice/oiaa/reports/early-learning-dashboards/child-care-stabilization**

**S: Mid kastaa miyuu ku dari doonaa lacag gaar ah mise waa inaad u qalanto dhammaantood si aad u hesho 10,000**

**J:** Shuruudaha lagu daro waa kuwo la iskor saarikaro. Ku dar kasta wuxuu ku dari karaa $ 10,000 wadarta guud ee deeqda. Tusaale ahaan, adeeg bixiye oo soo maro shuruudaha ka hawlgalka saxaraha xanaanada cunugga, taageeraaya sinnaanta isirka, oo ku yaal aag ay saamayn weyn ku yeelatay COVID wuxuu heli doonaa $ 30,000 qaddarkooda.

**S: Ma heli kartaa wax ka badan hal lacag dheerad ah**

J: Haa. Ku-darrada waa la iskor sarikaraa oo adeeg bixiyuhu wuxuu heli karaa ku-dar mid kasta oo ka mid ah qaybaha ay u qalmaan.

## Canshuuraha

**S: Deeqahan ma la canshuurayaa?**

J: Haa. Deeqaha waxaa loo tixgeliyaa dakhli. DCYF waxay u diri doontaa 1099 bisha Janaayo ujeedooyin canshuureed ah.

## Codsiga

**S: arjigu hadda ma furan yahay? Goorma ayaa u malaynaysaa in habka codsigu furmi doono?**

J: Codsiga Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurtu wuxuu furnaandoona maalmaha soo socda. DCYF waxay diri doontaa isgaarsiin marka arjiga la furo.

**S: Sidee xarunta xanaanada cunugga ruqsad u haysta oo aan helin wax kabitaan ah u mari karaa bogga internetka bixiyaha ah ee WA?**

J: Dhammaan xarumaha xanaanada cunugga ruqsad haysta waxay mari karaan bogga internetka bixiyaha ah ee WA. Haddii aad u baahan tahay caawimo helitaanka, email u dir dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov ama wac 866-627-8929.

**S: Habka codsigu ma la mid yahay deeqaha hore?**

J: Habka codsiga ee bixiyeyaasha xanaanada cunugga ruqsad haysta iyo kuwa shahaadaha haysta waa dareemiyaan inay aad u yaqaanan deeqaha hore ee na lamid tahay. Si aad u hesho

khayraad badan, oo ay ku jiraan hagaha tallaabo-tallaabo ee sida loo buuxiyo arjiga, booqo webpage-ka Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta.

**S: Yaa ka caawinaya bixiyeyaasha arjiyada? Waa maxay doorka tababaraha ee deeqdan?**

J: Haddii aad u baahan tahay kaalmo farsamo, oo ay ku jirto kaalmada afkaaga, hagitaan diyaarinta iyo helitaanka arjiga, ama su'aalo ku saabsan kharashaadka iyo kaydinta rasiidhada, waxaad la xiriiri kartaa Imagine Institute ama Voices of Tomorrow.

- **Imagine Institute**
  telefoonka: 206-492-5249
  emailka: **CCSG@imaginewa.org**

- **Voices of Tomorrow** (taageeraya bixiyeyaasha xanaanada cunugga ee Bariga Afrika):
  telefoonka (206) 278-8290
  emailka: **childcaresupport@tomorrowvoices.org**

**S: RFP -ga taageerada ma si ballaaran baa loo diray? Sidee loo soo xulay Imagine iyo VOT?**
J: DCYF waxay raacday tilmaamaha qandaraaska ee Gobolka Washington waxayna adeegsatay codsi tartan ah oo ku saabsan hannaanka soo -jeedinta (RFP) si loogu aqoonsado Imagine Institute iyo Voices of Tomorrow (VOT) inay yihiin tartamayaal guuleysta si ay u helaan qandaraasyo si ay u siiyaan Kaalmada Farsamaynta Deeqda Xasilinta Daryeelka Ilmaha.

## Kharash garayn

**S: Intee in le'eg ayee tahay oo waqti ah inaan ku isticmaal kara lacagaha deeqda ah?**
J: Bixiyeyaashu waa inay ku isticmaalaan deeqdooda hal sano gudahood markay helaan abaalmarinta.

**S: Haddii Daryeelka Carruurta Qoysku u wareejiyo shatigooda qof kale kahor Juun 2022, ma tahay in mid ka mid ah deeqda dib loo bixiyay?**
J: Si loo codsado Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta, bixiyeyaashu waa inay caddeeyaan inay sii ahaan doonaan kuwo furan oo u adeego carruurta sannad dugsiyeedka 2021-22 ee degmo dugsiyeedka oo ay sameeyaan dadaal kasta si ay u sii ahaadaan kuwo furan wakhtigaas.

**S: Lacagtayda deeqda ma ku gadan karaa baabbuur?**
J: Maya, lacagta deeqda xasillinta daryeelka xanaanada looma isticmaali karo in baabuur lagu gato. Laakiin deeqda waxaa loo isticmaali karaa in baabuurka lagu dayaco, shiddaal ito qarashka caymiska baabuurka aad u isticmaalasid xanaanada.

**S: Lacagaha deeqda ma loo isticmaali karaa hagaajinta booska daryeelka ilmaha?**
J: Lacagaha deeqda looma adeegsan karo hagaajinta raasumaalka (dhismaha ama dayactirka u baahan oggolaanshaha). Dayactir yar ayaa la oggol yahay. DCYF waxay isku dari doontaa liiska tusaalooyinka, waxayna la shaqayn doontaa khabiirada gargaarka farsamada (TA) si loo hubiyo inay haystaan jawaabaha saxda ah.

**S: Haddii aan rabo inaan ballaariyo xannaano -maalmeedkeyga si aan u helo meel bannaan oo aan carruurta ku kala fogeeyo sido u raaco masaafada bulshada, ma isticmaali karaa lacagta si aan u dhiso garaash kale?**
J: Maya, Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta looma isticmaali karo dhismo, ama dayactir weyn oo u baahan oggolaansho.

**S: Mid ka mid ah isticmaalka la oggol yahay ee deeqaha ma in loo qaybiyo FCC, sida kirada oo la mid ah boqolleyda booska ama waqtiga/booska guriga loo isticmaalo daryeelka ilmaha?**
J: Bixiyeyaasha ayaa laga yaabaa inay u isticmaalaan maalgelinta deeqda kharashka kirada ama ama deynta guriga daryeelka. Tan waxaa ku jira caymiska kirada iyo deynta guryaha.

**S: Ma u isticmaali karnaa lacagtan laga bilaabo Janaayo 1, 2021, kharashyadii hore u dhacay? Oo ay ku jirto lacag la amaahday.**
J: Haa, lacagahaas waxaa loo isticmaali karaa kharashyadii hore laga bilaabo Janaayo 1, 2021. Waxaad u baahan doontaa inaad keydiso rasiidhadaada.

**S: Ma sharxi kartaa wax badan oo ku saabsan xafidista rasiidka maxaa yeelay waxaan maqlaa waxyaabo kala duwan.**
J: Waxaa lagaa rabaa inaad haysato rasiidhada iibsiyada lagu sameeyay lacagaha deeqdaada .. Dhammaan rasiidhada iibsiyada ama adeegyada ama dukumiintiyada diiwaanka mushaharka waa in la hayaa shan (5) sano.

**S: Waa maxay macnaha "qaddarka celceliska" ee lagu bixiyay farriimaha wacyigelinta?**
J: Taasi waa celcelis ahaan qaddar qiyaas ah oo ku saleysan macluumaadka aan hayno ka hor inta uusan adeeg bixiyaha xanaanada cunugga codsan.

**S: Maxay bixiyeyaasha u heleen qiyaaso qaddar deeq oo kala duwan markay u adeegayaan isla bulshada?**
J: Qaddarka deeqda waxay ku saleysan yihiin dhowr arrimood oo ay ku jiraan nooca bixiyaha, awoodda shatiga leh, xogta dadweynaha, xogta kabidda, iyo xogta Early Achievers.